

## WAA MAXAY SABABTA IYO SIDA LOO QAADO BAARITAANKA IN QOF CUDURKA QABO?

Dadka ku hareereysan bukaanka qaba caabuqa waa la baaraa si loo eego inay sidoo kale qabaan caabuqa mise la il daranyihiin. Kani waa iyadoo la maraayo baaritaanka maqaarka ee qaaxada, IGRA (baaritaan dhiig) iyo/mise raajada sambabka.

Dadka ku hareereysan qof buka ayaa sidoo kale la baaraa, si loo ogaado halka uu cudurka ka yimid. Sidan oo kale, kalkaalisada, oo ay weheliso qofka buka, ayaa soo saarta liiska dadka uu bukaanku la macaamulay dhowrkii bilood ee la soo dhaafay: xubnaha qoyska, qaraabada, asxaabta, shaqo wadaagga, ardayda fasalka, xubnaha ururka mise naadiga wakhtiga firaaqada.

## MA DOONEYSAA INAAD WAX BADAN OGAATO?

Dhakhtarkaaga la tasho.

Booqo **www.departementzorg.be** mise la xiriir Waaxda Daryeelka gobolkaaga:

- Antwerp: 02 553 08 92
- Limburg: 02 553 08 93
- East Flanders: 02 553 08 94
- Flemish Brabant: 02 553 08 93
- West Flanders: 02 553 08 94

Booqo **www.vrgt.be** mise la xiriir Ururka Flemish ee Daryeelka Caafimaadka Habdhiska Neefta iyo Maareynta Qaaxada (VRGT) ee gobolkaaga:

- Antwerp
  Berchem: 03 287 80 10 - Turnhout: 014 41 13 62
- Brussels: 02 411 94 76
- Limburg: 011 22 10 33 (Hasselt)
- East Flanders: 09 225 22 58 (Ghent)
- Flemish Brabant: 016 79 09 92 (Leuven)
- West Flanders
  Ostend: 059 79 02 58 - Kortrijk: 059 79 02 57

Waxaa daabacay: Karine Moykens, Secretary General, Waaxda Daryeelka, Boulevard Simon Bolivar 17, 1000 Brussels | Sibteembar 2024

VRGT VLAAMSE VERENIGING VOOR RESPIRATOIRE GEZONDHEIDSZORG EN TUBERCULOSEBESTRIJDING VZW

Waaxda Daryeelka
infectieziektebestrijding@vlaanderen.be
**www.departementzorg.be**

Vlaanderen is zorgzaam en gezond samenleven



# QAAXO

DEPARTEMENT **ZORG**

**departementzorg.be**

**Qaaxadu waa cudur la kala qaado oo ay keento bakteeriyada tiibishada.**

**Nooca ugu badan ee cudurka waa qaaxada sambabada. Kalyaha, lafaha, maskaxda, qanjidhada muse xubnaha kale ayaa sidoo kale mararka qaar qaaxadu saameysaa.**

## SIDEE KU QAADI KARTAA CUDURKA?

Qaaxada waxaa si gaar lagu kala qaadaa hawada. Qofka qaba qaaxada sambabada faafta wuxuu hawada ku sii daayaa bakteeriyada qaaxada marka ay qufacaaan, hadlaan mise hindhisaan. Shakhsiyaadka ku nool deegaanka u dhow ee qofka buka ayaa suurtagal ah inay qaataan neef side bakteeriyada. Marka la qaato neef bakteeriya leh oo ay gasho sambabada, waxay keentaa barar yar. Tani sida caadiga ah iskeed ayay u bogsataa, balse caabuqa mararka qaar wuu faafaa.

Bakteeriyada waxay kaloo geli kartaa xubnaha kale (kalyaha, lafaha, maskaxda, qanjidhada, iwm.) iyadoo sii marta marinnada dhiigga mise marinnada habdhiska difaaca jirka. Qaaxada marnaba kuma gudubto walxaha (weelka wax lagu cuno, dharka, buugaagta, gogosha, iwm.)

## KUMAA QAADI KARI QAAXO?

Qof walba ayaa qaaxo ku dhici kartaa. Carruurta yaryar iyo dadka difaacoodu hooseeyo ayaa aad ugu nugul.

## WAA MAXAY ASTAAMAHA?

Calaamadaha ugu badan ee qaaxada sambabada ee markaas taagan waa:

- Qufac joogto ah, oo uu la socdo xaako
- cunto xumo
- miisaanka oo is dhima
- laab xanuun
- xummad (badan)
- dhidid habeenkii ah
- daal

Astaamuhu maahan inay dhacaan isku mar. Xitaa waxaa suurtagal ah inaadan muujin wax astaamo ah balse aad weli qabto qaaxo.



## QAAXADA MALA DAWEYN KARAA?

Gabi ahaanba waa la daweyn karaa qaaxada. Daweyntu waxay badanaa ka koobantahay saddex mise afar daawo (antibiyootig).

Waa inaad qaadataa antibiyootigan ugu yaraan lix bilood, maadaama bakteeriyada qaaxadu ay adag tahay in la baabi'iyo. Haddii aad u raaci weydo daawaynta sida laguugu qoray, waxa suurtagal ah inaad mar kale bukooto. Waxaa kaloo jirta fursad ah in dawayntu noqon karto mid waxtarkeedu yaraado sababtoo ah bakteeriyadu kama falceliso antibiyootiga caadiga ah.

## GOORMA AYAAD XANUUNKA DADKA KALE QAASIIN KARTAA?

Waad qaadsiin kartaa haddii xaakada la baaray ay muujiso bakteeriyada qaaxada (qaaxada sambabada ee la is qaadsiiyo).

Haddii bakteeriyada qaaxada aan laga helin xaakada, waxaa loo tixraacaa sida qaaxada sambabada ee aan faafayn. Haddii qaaxadu ay xubin kale gasho (aan sambabada ahayn), ma faafin kartid.

Haddii aad dawaynta sidii laguugu qoray u raacdo dhowr toddobaad, qufaca wuu yaraadaa oo markaa qof kale ma qaadsiin kartid. Maskaxda ku hay in aadan ahayn mid ka bogsaday xanuunka wakhtigaas. Ku celcelinta u quficidda si nadaafadi ku jiro waxay caawisaa joojinta faafitaanka xanuunka: ka leexo dadka oo afkaaga ku dabool tiish marka aad qufacayso. Oo markaa qashinka ku rid tiishka oo gacmahaaga ku dhaq biyo iyo saabuun shaambo.